

# Ruqsada Seattle

—qeyb ka mid ah taxanaha waaxyada-badan ee ku qoran adeegyada Magaalada iyo shabtiyada

## Digniinaha Dabka Laga hortagi karo ama "Digniinaha Beenta ah"

Janaayo 2025

Seattle Fire Department (SFD) waxay ka jawaabtaa qiyaastii 7,000 dab oo "been ah" ama digniin dab oo laga hortagi karo sanad kasta. Xaqiiqatan, qiyaas ahaan 1 ee 3 garaacisyada dabka ay helaan Waaxda Dabka Seattle sanad kasta waa digniino been ah, kuwo badan ayaa la xidhiidha yaraanta ilaalinta nidaam haboon. Digniinaha laga hortagi karo waxey jawaabayaan hore u qaadaan iyo injiinada dabka adeega ka dhamaadey ee garaacisyada degdega ah. Tirada badan ee digniinaha beenta waxey dhigtaa shaqo culus ee nidaamka dhan waxeyna yareeyaan awoodeena ilaalinta hantida iyo ilaalinta nololaha dhamaan kuwa nool, booqda, kana shaqeyya Seattle.

Sababtan, Seattle waxey bilowdey ganaaxa "digniinaha beenta" ama digniinaha dabka laga hortagi karo. Ujeedadu waa in la dhiirigaliyo ilaalinta iyo hagaajinaha loo baahanyhey ee nidaamyada digniinta iyo niyad jabinta xeerarka daryeel la'aanta kaaso ka dhalatey shidista digniinta.

Isfahankan Caawinta Macaamilka wuxuu bixiyaa xog badan ee sababaha digniinaha laga hortagi karo sidoo kale nashqadaha in mulkiilayaasha dhismaha ay isticmaali karaan digniinaha laga hortagi karo. Boga ugu dambeeya ee waraaqdan waxey bixinaysaa xog ku saabsan sharciyada xisbiga ka masuulka iyo ficialada la qaadayo hadii aad hesho kooto. SFD waxay si mahadnaq leh u aqoonsanaysaa Ururka Ilaalinta Dabka ee Qaran ee qaar badan oo kamid ah dhaqamada ugu fiican ee ku jira CAM.

### Waa maxey Digniinta Dabka Laga Hortagi karo?

Xeerka Dabka Seattle wuxuu qeexaa digniinaha laga hortagi karo sida soo socota:

- Shiditaan kasta ee nidaamka digniinta dabka kaaso

ka dhasha ogeysiinta SFD ee dhacdo dab taaso ku hagtay jawaabta SFD marka khatartaaso kale jirin.

- Dhamaan shiditaanada marka ayna jirin dab, marka shiditaanadaaso kale ay sababaan dhicitaan farsamo ama shaqo xumo ay ugu wacantahey tijaabo aan habooneyn ama ku filneyn iyo ilaalin, shidid kama' ah, shidis aan la garaneyn, ama isticmaal xumo, ee qof uun, ay ku jiraan dadka iibiya, buuxiya, ilaaliya, tijaabiya, ama la socda nidaamyada digniinta dabka.
- Aan ku jirin shiditaanada ay sababeen xaaladaha cimilada, dhibatoyinka laynka tilfoonka, socodka biyaha, dubayaasha biyaha, ama musiibooyinka dabiiciga.

### Nashqadaha Mulkiilayaasha Dhismaha ee Yareynta Digniinaha Laga Hortagi karo

Mulkiilayaasha dhismayaasha iyo maamulayaasha waxey ciyaari karaan door muuqda ee yareynta digniinaha "beenta" ama laga hortagi karo ee dhismayaashooda. Waa kuwan nashqadaha muhiimka:

*Ku Ilaali Diidmada La rabo, Tijaabo iyo Ilaalin*

Hayso nidaamkaaga dabka in la tijaabiyo sida ay u baahanyihiin xeerka dabka sanad kasta ee shirkad tijaabo shahaadeysan. Liiska shirkadaha shaqaaleysinaya farsamo yaqaanada loo ogolyahey shaqada digniinaha dabka ee Seattle halkan ayaa laga heli karaa: <http://www.seattle.gov/fire/business-services/systems-testing>

Marka dhibaatooyin ama "yaraansho" ee nidaamka digniinta dabka la helo inta lagu jiro tijaabada, shacri ahaan waa masuuliyada mulkiilaha dhismaha in khaladaadka si fiican loo hagaajiyo.

*Kafogow Sababaha Caalamiga ee Digniinaha Laga Hortagi karo*

Kuwan soo socda waa liis sababaha ugu fiican ee digniinaha laga hortagi karo, iyo salaanko mulkiilayaasha dhismaha ayaa qaadi kara si loo yareeyo. Nashqadahan

[www.seattle.gov/fire](http://www.seattle.gov/fire)

Qeybta Kahortaga Dabka  
220 3rd Avenue South



City of Seattle  
Fire Department

iyo kasii badan ayaa laga heli karaa Ururka Ilaalinta Dabka Qaranka (NFPA) *Tilmaanta Adeega Dabka ee Yareynta Digniinaha Dabka Aan loo baahneyn*, ku diyaara soo dejinta bilaashka [www.nfpa.org/redgd](http://www.nfpa.org/redgd).

**Karintu** waa mid ka mida sababaha hogaaminaya digniinaha dabka aan loo baahneyn.

- Hubi qalabka karinta inuu yaalo meelo haboon. Tusaale: meelaha xafiisyada maaha meelaha haboon ee koobka bunka iyo oofanada.
- Hubinta marawaxadahu ay shaqeynayaan inta lagu jiro cunto karinta.
- Beddel dareemayaasha qiiqa, halka la ogolyahey, ilaa dareeme kul--la hadal shirkadaada digniinta dabka ee dookhyada.

**Cabista sigaarku** waa sabab kale oo guud ee digniinaha laga hortagi karo.

- Ha ogolaalin meelaha loogu talogaley qiiqinta xadiga dhow ilaa dareemayaasha qiiqa, iyo bixinta haweynta haboon ee meelaha loogu talogaley qiiqinta.
- La hadal shirkadaada digniinta dabka ku saabsan dareemayaasha qiiqa isbedelaya ilaa dareemayaasha kulka ee meelaha qiiqa halkaaso la ogolyahey.

**Uumi** ka imanya tuushka iyo qalabyada sidoo kale way cariyaan digniinaha aan la rabin.

- Tixgali dib u meelaynta qalabyada dareemida qiiqa sida laga ogolyahey xeerka dabka ama bedelista qalabyada gaboobey ee tiknoolajiyado cusub taasoo ogolaata tilmaamo badan ee dabka oo yareysa digniinaha laga hortagi karo.

**Kildhiyada Looxa iyo Meelaha** dabka waxey sababi karaan qalabyada dareemida iney digaana.

- Nidaamkaagu waa in loogu talogaley si dareemayaasha kulku iyo dareemayaasha qiiqu ay ku yaalaan masaafoyin haboon ee kildhiyada looxa iyo meelaha dabka. Haddii aad waajaheyso digniino laga hortagi karo soo noqnoqda ay ugu wacantahey qalabyadan, kala tasho shirkadaada digniinta la xidhiidha meeleynta haboon ee qalabyada tijaabada.

Mashaariicda **dhismaha** sidoo kale waxey noqon karaan isha digniinaha laga hortagi karo.

- Boodhka dhismaha iyo "shaqada adag" sida wildhanka waa sababo bilow ee digniinaha laga hortagi karo.

Badbaado ahaan, waa inaad raacdaa xeerka dabka kaasoo ay ku jiri karto la tashiga Xafiiska Maarshaalka Dabka kahor intaad qaadin wax dareemayaal ah ama nidaamyo adeega ka baxsan. Marka la ogolaado, waxaad yareyn karaan digniinaha laga hortagi karo adigoo daboolaya dareemayaasha inta lagu jiro maalinta halka shaqada dhismaha ay si toosa u dhaceyso--soo saar iyaga wakhtiyada shaqada dhismaha aanu socon. Marwalba heyso dareemayaasha dhismaha la nadiifiyey oo fiiri dareenkooda kadib dhismaha la dhameeyo.

**Barnaamijka buuxinta nidaam digniin dabeed khalad ah** wuxuu sidoo kale sababi karaa digniinta laga hortagi karo.

- Nidaamyada digniinta dabka waxey leeyihiin sadex nooc oo shucaacyo ah -- "digniin dab", "kormeer", iyo "dhibaato". Nidaamka waa si haboon loo buuxiyaa si loo kala saaro xogta ka imaneysa qalabyada dareemida sida "dhibaato", "kormeer", ama "digniin dab". Mararka qaar iyadoo ugu wacantahey khalad buuxineed, xaalado badan ayaa galiya dhismaha digniin kumana xidhna shirkada la socodka/SFD sida "digniin dab". Shirkadaada digniinta dabka waxey hubin karaan in qalabyada dareemida iyo xaaladaha la kormeey ay si haboon uga falcelinayaan digniinta dabka, kormeerka iyo shucaaca dhibaataada.

**Jiiditaano maanuwal** ah wuxuu noqon karaa isha digniinaha laga hortagi karo hadii dadku soo jidaan marka degdeg dab aanu jirin.

- Ku xidh daboolada ilaalinta la ansixiyey ee istaamada jiidista si looga hortago shiditaanka xun ama kediska ah.

*Tixgali Cusbooneysiinta Nidaamkaaga Digniin si aad Uga Fogaato Digniinaha Laga Hortagi karo*

Iyadoo ku xidhan abuurta digniinaha laga hortagi karo eed dareemayso, waxaad rajeyn kartaa inaad falanqeyso xaalada farsamo yaraanka digniinta. Dookhyada ayaa diyaar ku noqon kara sida bedelida dareemayaasha qiiqa ee gaboobey iyo qalabyo kale oo dareemis ee qalabyad cusub taaso ka jawaabta xaaladaha dabka badan, iyo tarminta digniinaha beenta ah.

*Bixi Waxbarashada Kirada*

Haddii dhismahaagu la tacaalayo digniino soo noqnoqday ay sababeen kireystayaashaadu:

- Bixi waxbarashada kireystayaasha iyo shaqaalaha dhismaha. SFD waxey leedahey woxogaa alaabaha waxbarasho aad la isticmaali karto kireystayaashaada iyo shaqaalahaaga. Fadlan eeg buuga degitaanka qoysaska-badan halkan: <http://www.seattle.gov/Documents/Departments/Fire/Safety/MultiResidentialHandbook.pdf>

### Caawimo Dheeraad ah oo ka imanaysa Waaxda Dabka Seattle

Hadii aad dareemayso digniino laga hortagi karo oo badan, fadlan la xidhiidh SFD. Waxaan kusiin doonaa xog taariikhiya ee dhismahaaga gaarka ah si aad u falanqeyn karto nooca digniinaha laga hortagi karo ama "beenta" ah ee dhacey. Macluumaadka waxey kaa caawin kartaa soocista nooca dhibaatooyin aad helayso, si ay kaaga caawiso shirkadaada digniinta dabka iney qorsheyso xal. Usoc dir codsiyadaada xogta:

[SFD\\_FMO\\_SystemsTesting@seattle.gov](mailto:SFD_FMO_SystemsTesting@seattle.gov).

Hadii ay dhacdo shaqo digniin adag ama joojto ah, adagtahey in la yareeyo, Qeybta Kahortaga Dabka waxey awoodi doonaan bixinta balamaha isla-meeshaha si loo falanqeyyo xalalka muhandisnimo. Waxaa jira helitaan xadidan ee balamahan, waxaana loo kala hormariyaa iyadoo lagu saleynayo darnaanta xalalka digniinta laga hortagi karo.

### Waa maxey Kooto iyo Maxaa Dhaca Hadii Aan Helo Mid?

Kootadu waa digniin aan-dambi ahayn ee xadgudubka taaso ay ku jiraan ganaax lacageed.

Ma jiro wax bilaaha digniinta laga hortagi karo hore inta lagu jiro rubuca sanadka kaalandarka, ee wadarta ilaa afar digniin ganaaxood sanad kasta ee dhisme kasta. Halkaa kadib, ganaaxa xiga ayaa la xukumi doonaa: hal ganaax ee \$373 ee laba ilaa shan tacadiyo ee isla rubuca ee sanad kaalandar, ama hal ganaax \$746 ee lix ilaa sideed tacadiyo ee isla rubuca sanadka kaalandarka, ama hal ganaax \$900 ee 9 ama tacadiyo ka badan ee isla rubuca sanadka kaalandarka. Koontooyinka waxaa loo qori doonaa mulkiilaha dhismaha.

Koontooyinka waa laguusoo diri doonaa ama caadi laguugu keeni doonaa. Marka aad hesho kootada, waa inaad ku jawaabta 15 maalmo kaalandar mid ka mida saddex hab:

1. Bixi ganaaxa.

2. Codso joiojinta dhageysiga si aad u sharaxdo xaaladaha. Kiisaska qaar, baabiinta waxey dhali kartaa ganaax hoose. Dhageysiga baabiinta waa in la codsadaa qoraal ahaan adigoo isticmaalaya foomkakootada fariimeysan/lagu keenay adiga.
3. Codso ogolaanshaha kootada, hadii aad aaminsantahey tacadiga kootada aanu dhicin ama inaanu qofku meelayn kama masuul aha tacadiga. Dhageysiga tijaabada kootada waa in lagu codsadaa qoraal iyadoo la isticmaalayo foomka kootada fariimeysan/adiga lagu keenay.

Fadlan sidoo kale eeg macluumaadka ka soo baxay Baaritaanka Dhagaysiga ee Magaalada Seattle: <https://www.seattle.gov/hearing-examiner/citations>

### Ikhtiyaarka lagu maalgeliyo Cusboonaysiinta Nidaamka Alaarmiga Dabka Badalkii Bixinta ay Keeni Lahayd Ganaax

Himilada SFD waa ilaalinta nolosha iyo ilaalinta hantida. Hadafkayagu waa adeega marka mulkiilayaasha guryaha ay hagaajiyaan hababka alaarmiga digniinta dabka si ay u caawiyaan yaraynta alaarmiga mustaqbalka ee laga hortagi karo. Haddii aad rabto inaad maalgaliso hormarinta nidaamka alaarmiga digniinta dabka ee dhismahaaga badalkii aad bixin lahayd ganaax, waxaad codsan kartaa in Magaaladu ay ku xisaabiso kharashaadkaaga nidaamka alaarmiga digniinta dabka si aad uga fogaato bixinta ganaaxa ciqaabta, lacagta, ilaa cadadka ganaaxa buuxa.

Haddii aad doorato inaad nidaamkaaga maalgashatid si aad u dhinto alaarmiga laga hortagi karo, SFD waxay kuu soo jeedinaysaa inaad la shaqeyso qandaraaslahaaga dab-damiska si aad u qiimayso kuwa soo socda xeeladaha. Fadlan ogow inay isbadaladan ay u baahan karaan ogolaansho ama ogolaansho kale sida kala duwanaanshaha koodhka laga bilaabo Dab-demiska: aaladaha lagu ogaado ka wareegitaanka; joojinta saldhigyada gacanta lagu jiido ee si buuxda dabka loogu rusheeyey dhismayaasha; cusboonaysii nidaamka digniinta dabka ka caawi inaad iska ilaalisoo digniinaha laga hortagi karo. Qandaraaslahaagu waa laga yaabaa sidoo kale hayso talooyin kale oo gaar ah dhismaha iyo nidaamka digniinta.

Kala Xiriir Maareeyaha Bulshada Dhimista Khatarta ee SFD